# Isticmaalida **kalkulaytarisku** waxay ilmahaaga ka caawimi karaan tirabarshada.

### Isticmaalida kalkulaytarka si lagu hello nambaro

Marka carruurtu ku cayaaraan kalkulaytarkooda waxay ka hellaan waxa dhaca markay riixaan boton ka duwan. Kala hadal waxay sameeyeen si ay u bedelaan nambaradii shaashada.

### Isticmaal kalkulaytor si lagu raadiyo astaamaha nambar

sticmaal kalkulaytor si loo tiriyo nambara badan. Si aad ugu tiriso shan-shan riix

| 5 | + | = | = | = |
|---|---|---|---|---|

Si aad ugu tiriso toban-toban riix

| 1 | 0 | + | = | = | = |
|---|---|---|---|---|---|

*Fadlan ogsoonow kalkulaytoriska waaweyn qaarkood in laga yaabo inay u shaqeeyaan si sidaan ka duwan.*

Ku fiiri ilmahaaga aragna in nambaradu ku badanayaan shaashada. Weydii ilmahaagu inuu joojiyo oo saadaaliyo nambarka soo socda. Hubi si aad u ogaato.

Carruurta qaarkeed ayaa jecel ku qorida nabarada laynka dheer ee warqada. Waxay raadin karaan astaan. Carruurta qaarkeed waxay jecel yihiin inay sheegaan nambarada marka ay shaashada ka muuqdaan waxayna jecel yihiin inay ku qoraan khadka dheer ee warqada. Weydii: *ma jirtaa astaan aad arki karto?*

Isku day inaad ka bilawdo nambarka 7 una tiri laba-laba, shan-shan, toban-toban IWM. Isku day inaad gadaal gadaal u tiriso adoo ka soo bilaabaya 1000 toban-tobana u tirinaya adoo isticmaalaya badhankaan [ − ].

### Isticmaalida kalkulaytarka si aad u cayaarto cayaar (games)

**Ku noqo eber:** Qof waliba markiisa ha qaato si loo bedelo mid ka mid ah godka nambarka sida 526 ilaa 0 hal dhaqaaq. Masalan, si loo bedelo labo ilaa eber 526 laga gooyey 20 oo keenaysa 506. Wad ilaa shaashadu muujiso 0.

**Waad ka caawimi kartaa ilmahaaga shaxda isku dhifashada**

Weydii: *inta jeer ee la isku darayo 7 si loo hello 42? Immisa lixaad ayaad u malaynaysaa inay ku jiri doonto 42?*

Isticmaal kalkulaytarkaaga si aad u hubiso inaad saxnayd iyo in kale.



Haddii aad jeclaan lahayd inaad ogaato intaas ka badan......

- La xiriir dugsiga agtaada ah ama la hadal ilmahaaga macalinkiisa
- Ka fiiri websaytka isticmaalna erayadaan waaweyn si aad u raadiso: numeracy, number sense, mathematical games, number, chance iyo data

Qoraalkaani wuxuu ku jiraa internetka websaytka:
www.dest.gov.au/schools/publications/indexhtm
iyo
www.gu.au/schoolscls/clearinghouse/

**Koobiya intaas ka badan oo qoraalkaana waxaa laga dalban karaa: The Clearinghouse for Literacy and Numeracy Research (Hayada Cilmibaarista Farbarashada iyo Tirabarashada) Tel: 07 3875 5703**


MURDOCH UNIVERSITY

*Qoraalkaan waxaa kharajkiisa bixisay Dawlada Australia taas oo qayb ka ah ballanqaadkeeda wanaajinta natiijada tirabarashada dhamaan ardada.*



Australian Government
Department of Education, Science and Training


SANADAHA DHEXE EE DUGSIGA HOOSE

# Tirabarashada:

## Qoysaska wadajirka **uga wada shaqaynaya**

fursaduhu meel kasta waa ka jiraan




SOMALI / MIDDLE PRIMARY YEARS

# Maxaan uga jeednaa **Tirabarshada**?

Carruurtu waxay yeeshaan xirfada tirabarashada markay u isticmaalaan fikrada xisaabaadka xaalladahooda maalmeed.

Waxay macna ka sameeyaan xaalladahaan iyagoo weydiinaya su'aallo sida:




## Ma caawimi karaan **qoysasku**?

***Haa!***

Waxaa laga yaabaa inaad dareento in xisaabaadka lagu sameeyo dugsigu ka duwan yihiin sida laguu soo baray, ama xisaabtu aanay ahayn maadada aad ugu jeclayd. Waxaase laga yaabaa inaad ilmahaaga weli siyaabo badan u caawimi karto.

Macluumaadka soo socda ayaa kaa caawimi doona inaad carruurta ka caawinto barashada iyo jeclaanta isticmaalida fikradaha xisaabaadka waxqabadka maalmeed.

## Qoysasku way caawimi karaan iyagoo:

**Ka Jawaabaya fikradaha ilmahoodu....**

- iyagoo dhegaysanaya, kalana hadlayo wixii ku saabsan nambarka, qaabka iyo baaxada sheyga, masalan, cayaarta, dhismaha, sawirada, jabaqda iyo sheekooyinka
- weydiinaya su'aallahaan oo kale:




**U tilmaamida...**

- sida nambaradaani nooga caawimaan inaan hello waxyaallo, in aan ogaano intay yihiin, inaan ogaano immisa iyo ogaanta midkuu yahay.

**Raadinta fursadaha meesha carruurtu awoodaan....**

- inay ka doortaan qalab ku kala duwan qaabka, xajmiga si ay uga waxy ku cayaaraan uguna cayaaraan
- inay kala saaraan waxyaallo sida kooxaha kaarar ah oo la is dhaafsanayo, lacag jajab ah qalabka lagu cayaaro CD-yaal iyo fiidiyo
- ka qaybgelinta qorshaynta iyo hindisida waxay dhisayaan sida guri yaryar oo lagu dhuumaalaysto, shey wax loo ekaysiiyeyi iyo qalcadaha ciida laga sameeyo

## Sidee **dugsiyada iyo qoysasku** u wada shaqayn karaan?

**La hadal** ilmahaaga macalinkiisa wixii ku saabsan tira ku barashada guriga iyo dugsiga lana socodsii wixiii dareen ah ee aad ka qabto iyaga.

**Weydii** macalinka sida aad uga caawimi karto barnaamijka xisaabta ee fasalka.

**Caawin** ilmahaaga si uu u jeclaado xisaabaadka ay ku sameeyaan dugsiga adoo si dhiirigelin ah ugala hadlaya markay guriga keenaan xisaabta.



**Kaalmee** Macalinka/dugsiga adoo tegaya fadhiga waalidka iyo adoo waqtigaaga ku tabarucaya ama kaalmaynaya.

**Raadi** sida xisaabaadku isu bedeleen intii ka dambaysa waqtigaagii dugsiga.

**Raadi** sida ilmahaagu ugu isticmaalo kalkulaytarka dugsiga.

**Caawin** ilmahaaga si ay u qorsheeyaan inta lacag ah ee ay u baahan yihiin si ay qado u gataan ama dibad bax u aadaan. Masalan, weydii inay ku qoraan inta lagu dalbanayo. Weydii inay hubiyaan inay haystaan lacag ku filan.



# Liistada waxa la samaynayo

**Qoysasku waxay raadin karaan fursado ay ku tilmaamayaan kagana jawaabayaan fikrada tirabarashada ee carruurta. halkaan waxaa ku yaal masaalo:**

## Safarka:

Marka aad safar dheer aadayso, ka qaybgeli carruurta inay kula eegto meelwayga si loo hello dariiqa ugu fiican oo lagu tegi karo meeshaad ku socoto. Markay ku weydiiyaan immisay qaadanaysaa? Tus sida loo isticmaalo calaamadaha wadada iyo khariidada sida lagu hello.

Marka aad u istaagayso inaad gadato shidaalka weydii carruurta: *shidaalku halkan ma ku riqiisbaa? Ma ku qaalibaa? Waa maxay faraqu?*

## Cayaaraha:

Ffiiri goolasha inta cayaartu socoto weydiina: *Yaa laga yaabaa inuu guulaysto? Sababtuse waa maxay?* cayaartu markay dhamaato weydii inta kooxdaada lagaga badiyey iyo inta kooxda kale ku badisay?

Kala hadal munaasabadaha cayaaraha waaweyn iyo waqtiyadooda iyo rikoorkooda. Weydii: *Sidee dabaashoodu degdeg u ahayd? Ma ka dheeraynaayeen markii hore?*

Marka dabaasha la aadayo weydii: *Inta meesha dabaashu hoosayso? Sidee ku ogaan kartaa? Ma amaan baa in lagu dabaashu ama lagu soo boodo si loo quuso?*

## Guriga:

Markaad ka hadlayso barnaamijyada TV-ga weydii: *Intee barnaamijku qaadanayaa? Ma haysanaa waqti aan ku daawano inta aynaan bixin? Ma duubanaa?*

La hadal ilmahaaga wixii ku saabsan istaraatiijiyada ay ku isticmaalaan kaarka gaymamka kumbuyuutarka iyo kuwa boodhka dushiisa lagu cayaaro.

## Waxgadashada

Marka carruurta aad la samaynayso shoobing ama wax gadid weydii su'aallahaan oo kale: *Ma haysataa lacag kugu filan oo aad wax ku gadato? ma helli doontaa wax jajab ah? Immisa siyaada ah ayaad u baahan tahay inaad gadato mid kale? Maxaad ku gadan kartaa $2.00?*






Liistada waxa la samaynayo

Qoysasku waxay raadin karaan fursado ay ku tilmaamayaan kagana jawaabayaan fikrada tirabarashada ee carruurta. halkaan waxaa ku yaal masaalo:

Safarka:

Marka aad safar dheer aadayso, ka qaybgeli carruurta inay kula eegto meelwayga si loo hello dariiqa ugu fiican oo lagu tegi karo meeshaad ku socoto. Markay ku weydiiyaan immisay qaadanaysaa? Tus sida loo isticmaalo calaamadaha wadada iyo khariidada sida lagu hello.

Marka aad u istaagayso inaad gadato shidaalka weydii carruurta: shidaalku halkan ma ku riqiisbaa? Ma ku qaalibaa? Waa maxay faraqu?

Cayaaraha:

Ffiiri goolasha inta cayaartu socoto weydiina: Yaa laga yaabaa inuu guulaysto? Sababtuse waa maxay? cayaartu markay dhamaato weydii inta kooxdaada lagaga badiyey iyo inta kooxda kale ku badisay?

Kala hadal munaasabadaha cayaaraha waaweyn iyo waqtiyadooda iyo rikoorkooda. Weydii: Sidee dabaashoodu degdeg u ahayd? Ma ka dheeraynaayeen markii hore?

Marka dabaasha la aadayo weydii: Inta meesha dabaashu hoosayso? Sidee ku ogaan kartaa? Ma amaan baa in lagu dabaashu ama lagu soo boodo si loo quuso?

Guriga:

Markaad ka hadlayso barnaamijyada TV-ga weydii: Intee barnaamijku qaadanayaa? Ma haysanaa waqti aan ku daawano inta aynaan bixin? Ma duubanaa?

La hadal ilmahaaga wixii ku saabsan istaraatiijiyada ay ku isticmaalaan kaarka gaymamka kumbuyuutarka iyo kuwa boodhka dushiisa lagu cayaaro.

Waxgadashada

Marka carruurta aad la samaynayso shoobing ama wax gadid weydii su'aallahaan oo kale: Ma haysataa lacag kugu filan oo aad wax ku gadato? ma helli doontaa wax jajab ah? Immisa siyaada ah ayaad u baahan tahay inaad gadato mid kale? Maxaad ku gadan kartaa $2.00?







Liistada waxa la samaynayo

Qoysasku waxay raadin karaan fursado ay ku tilmaamayaan kagana jawaabayaan fikrada tirabarashada ee carruurta. halkaan waxaa ku yaal masaalo:

Safarka:

Marka aad safar dheer aadayso, ka qaybgeli carruurta inay kula eegto meelwayga si loo hello dariiqa ugu fiican oo lagu tegi karo meeshaad ku socoto. Markay ku weydiiyaan immisay qaadanaysaa? Tus sida loo isticmaalo calaamadaha wadada iyo khariidada sida lagu hello.

Marka aad u istaagayso inaad gadato shidaalka weydii carruurta: shidaalku halkan ma ku riqiisbaa? Ma ku qaalibaa? Waa maxay faraqu?

Cayaaraha:

Ffiiri goolasha inta cayaartu socoto weydiina: Yaa laga yaabaa inuu guulaysto? Sababtuse waa maxay? cayaartu markay dhamaato weydii inta kooxdaada lagaga badiyey iyo inta kooxda kale ku badisay?

Kala hadal munaasabadaha cayaaraha waaweyn iyo waqtiyadooda iyo rikoorkooda. Weydii: Sidee dabaashoodu degdeg u ahayd? Ma ka dheeraynaayeen markii hore?

Marka dabaasha la aadayo weydii: Inta meesha dabaashu hoosayso? Sidee ku ogaan kartaa? Ma amaan baa in lagu dabaashu ama lagu soo boodo si loo quuso?

Guriga:

Markaad ka hadlayso barnaamijyada TV-ga weydii: Intee barnaamijku qaadanayaa? Ma haysanaa waqti aan ku daawano inta aynaan bixin? Ma duubanaa?

La hadal ilmahaaga wixii ku saabsan istaraatiijiyada ay ku isticmaalaan kaarka gaymamka kumbuyuutarka iyo kuwa boodhka dushiisa lagu cayaaro.

Waxgadashada

Marka carruurta aad la samaynayso shoobing ama wax gadid weydii su'aallahaan oo kale: Ma haysataa lacag kugu filan oo aad wax ku gadato? ma helli doontaa wax jajab ah? Immisa siyaada ah ayaad u baahan tahay inaad gadato mid kale? Maxaad ku gadan kartaa $2.00?






## Liistada waxa la samaynayo

Ku dhiirigeli ilmahaaga inay ku weydiiyaan su'aallo si ay uga caawinto dareenka xaalladahooda maalmeed?




## Liistada waxa la samaynayo

Ku dhiirigeli ilmahaaga inay ku weydiiyaan su'aallo si ay uga caawinto dareenka xaalladahooda maalmeed?




## Liistada waxa la samaynayo

Ku dhiirigeli ilmahaaga inay ku weydiiyaan su'aallo si ay uga caawinto dareenka xaalladahooda maalmeed?

